



Date: 19-July 2016

War-saxaafadeed

Guddiga fulinta (BoD) Bulshada Rayidka ah ee Puntland (PUNSAA) oo soo saaray War Saxaafadeed ku wajahan Gudiyada Doorashada ee heer Federaal, heer dawladdaha xubnaha ka ah iyo hogaanka dhaqanka oo ku saabsan doorashada 2016

Guddiga fulinta Bulshada Rayidka ah ee Puntland (PUNSAA) oo kulankooda saddex bilood laha ahaa soo gabagabeeyey maanta 19/07/2016 ayaa ku boorriyey masuuliyiinta u xilsaaran fulinta hawlaha doorashada in ay si adag uga fekeraan masuuliyadda iyo xilka ay bulshada u qaadeen. Xulidda ergada wax dooranaysa iyo xubnaha la dooranayo oo si waanaagsan loo hirgeliyaa Waxay fursad u tahay in Ummadda Soomaaliyeed ay ka baxdo xaaladda Musuqmaasug, Amaan darida iyo jaha wareerka siyaasadeed ee ay muddada ku jirtay.

Guddiga Fulinta PUNSAA waxa ay nabad doonada soo xulaya Ergada wax dooranaysa iyo Isimada ugu dambaynta saxiixaya kula dardaarmayaan in hannaanka soo xulidda ay ka ilaaliyaan qof jeclaysi, eex iyo qaraabo kiil. Taas oo haddii ay dhacdo keeni karta iska horimaad, isnacayb iyo kalsooni darro bulshada dhexdeeda ah taas oo sababi karta in natiijada doorashada kasoo baxdaa aanay helin aqbalaadda iyo kalsoonida bulshada

Guddiga fulinta ee PUNSAA waxay Guddiga doorashada ee heer dawlad goboleed (SEIT) ugu yeerayaan in ay si culus oo masuuliyadi ku jirto u fuliyaan hawlaha doorashada iyagoo ilaalinaya xeerarka iyo nidaamka loo dejiyey doorashooyinka. Waxay kale oo ugu baaqeen in ay si hufan u gutaan hawlaha ay ummadda masuulka uga yihiin. Waxa suurta gal ah in Soomaaliya ka soo waaqsan weydo haddii loo xulo xubno gole wakiilo oo magaca mooyee aan macne sii ridan u lahayn mansabka iyo masuuliyadda dusha ka saaran. Soo xulidda ergada iyo xubno wanaagsan oo la doortaa waa fursadda asaaska u ah in Soomaaliya ay ka bogsooto jahawareerka siyaasadeed, musuqmaasuqa iyo ammaan darrada ka jirta dalka.

Guddiga fulinta ee PUNSAA waxa ay dawladda Puntland ku adkaynayaan in ay si dhab iyo niyad ah u fuliso doorashada kana ilaaliso turxaanta iyo deel-qaafka, daloolada iyo holinta in doorashadu ay fashilanto iyadoo ay waajib iyo xil saaran tahay in dawladu ay ilaaliso rabitaanka dadweynaha lana dagaalanto musuqmaasuqa iyaduna aaney haweyn.

Guddiga fulintu ee PUNSAA waxa ay ku tirtirsiiyaan dhammaan cidda ku hawlan doorashada in saamiga Haweenka meel cad la saaro oo aaney marti u noqon hoggaanka dhaqanka iyo siyaasiyiinta iyadoo la ilaalinayo xaquuqda dastuuriga ah ee haweenka

Guddiga fulinta ee PUNSAA waxa ay Dawladda Puntland usoo jeedinayaan in ay magacawdo Guddiga xalinta khilaafaadka Doorashooyinka oo ay hormuud ka yihiin bulshada rayidka ah, laguna soo xulo aqoonta ay u leeyihiin xallinta khilaafaadka iyo sumacadda ay ku leeyihiin bulshada dhexdeeda.

PUNSAA waxa kale oo u soo jeedinayaan Dawladda federaalka, Dawladaha xubnaha ka ah iyo beesha caalamka inay xil weyn iska saaraan siday doorashadu ugu dhici lahayd si hufan. .

Mahadsanidiin

Nor Shire Osman

Gudoomiyaha Dallada PUNSAA

